

SHIRKA GOLAHA DHAQAALAHA CALAAMKA ISLAAMKA OO KA DHACAYA INDONESIA

Maanta oo ay taariikhdu ku beegneyd 2^{da} Maarso 2009, waxaaa si rasmi ah magaalada Jakarta uga furmay Gole Sanadeedka Dhaqaalaha Caalamka Islaamka (*World Islamic Economic Forum*) oo xaruntiisu tahay magaalada Kuala Lumpur, Malaysia. Sanadkan oo hal ku dhig looga dhigay: Damaanada Cuntada iyo Tamarta (*Food Security and Energy*), taasoo lagu falanqeynayay sidii loo dejin lahaa istiraatiijiyad xoogan oo looga hortagi karo dhibaataada dhaqaale ee adduunkan ka jirta.

Shirkan oo qeybo kale lahaa sida: Horumarinta iyo wax wada qabsiga dhallinyarada, Haweenka iyo Ganacstada calaamka Islaamka, ayaa waxaa maanta xariga ka jaray Madaxweynaha Indonesia, iyadoo ay ka soo qeybgaleen madax ka kala socotay dawlada: Yemen, Morocco, Malaysia, Qatar, Bahrain, Emirate, Uganda, Kazakhstan, Kuwait, Saudi Arabia. Sidoo kale waxaa ka soo qeybgalay golahan: Bankiga Horumarinta Islaamka (IDB), Ururka Islaamka (OIC) iyo hay'ado horumarineed oo heer caalami ah.



Golahan oo taabanaya baahida dadyowga Caalamka, gaar ahaan kuwa Muslimka ah, ayaa waxaa Soomaaliya uga soo qeybgalay wafdi uu hogaaminayay Danjiraha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia Md. Maxamuud Colow Barow, oo wakiil ka ahaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, ayna xubno ka ahaayeen Dr. Xuseen Cali Axmed iyo Cabdullaahi Sheekh. Wafdigu, wuxuu si gaar gaar ah u arkay madax dawladeed iyo kuwo hay'adeed oo ka soo qeybgashay shirkaas.

Sidoo dhanka Indonesia, waxa ay maanta la kulmeen Madaxa Rugta Ganacsiga Soomaaliyeed ee Indonesia oo ay u sheegeen in ay Soomaaliya ka mid tahay wadamada sida aadka ah u maalgeliya Indonesia, maadaama ay ganacsatada Soomaaliyeed ka qaadaan Indonesia dhamaan macaawiisaha ay soo saaraan



warshadaha Indonesia iyo qalabka dhismaha. Dhankooda waxay ballanqaadeen in ay dhowaan diyaarin doonaan gacansato ka kala socoto warshadahaas si ay bandhig caalami ah ugu sameeyaan suuqayada ay Soomaalida sida aadka ah gacanta ugu hayaan, sida; Dubai, Jeddah, Nairobi, Addis Ababa iyo meelo ka mid ah Soomaaliya oo ka dhigi doonaan bandhig ganacsi oo xaga dharka ah oo ay ugu horeyso Macaawiisaha.

Shirkan oo berri la soo gabagabeyn doono, ayaa la filayaa in ay ku dhawaaqaan madaxda Islaamka maalin lagu sameeyo wadanka Indonesia oo kor u dhaafaysa ilaa 30 Billion oo doolarka Mareykanka ah.

Jakarta, 02 Maarso 2009

Safaaradda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia
JI Salak No. 5, Guntur, Jakarta Selatan 12980
Email: somaliemb@indo.net.id